

*Lifaaq ku saabsan sharciga Qareennada
Nidaaminta Hawlaha Iskaashatada Qareennada*

QAYBTA 1aad

DHISMAHA IYO UJEEDDADA ISKAASHATADA

1. *Dhismaha Iskaashatada.* — 1) Iskaashatada Qareennada waa hay'ad midaynaysa Qareennada Jamhuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. Waxayna leedahay shakhsiyada sharciyeed.

2) Si loo dhiso Iskaashatada wuxuu Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta magacaabayaa Guddi soo qaban qaabisa dhismaha Iskaashatadaas.

3) Dhismaha Iskaashatada waxaa ogolaanaya Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, wuxuuna ku soo saarayaa Dekreeto.

2. *Ujeeddada Iskaashatada.* — 1) Iskaashatada waxaa waajib ku ah in ay suuro geliso qof iyo hay'ad kastaba si ay u helaan Qareen ka daafaca xagga Sharciga.

2) Danta weyn ee laga leeyahay hawlaha Iskaashatada waxay tahay in la hagaajiyo shaqada Qareennada si loo daryeelo xuquuqda iyo danaha dadweynaha loona xoojiyo sharcinnimada hantiwadaagga.

3) Iskaashatada waxaa waajib ku ah iyadoo la kaashanaysa hay'adaha Dawladda ee Siyaasadda iyo Jamacadda Ummadda inay kor u qaado aqoonta siyaasadda iyo xirfaddaba ee Qareennada.

3. *Xiriirka Iskaashatada la leedahay Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.* — 1) Iskaashatada waxay xiriir la yeelanaysaa Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta si ay hawsheeda si habsami ah u gudato.

2) Iskaashatada waa inay soo ogeysiisaa Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta fadhiga guud iyo faadhiyada ay leeyihiin Guddiga Maamulka iyo Guddiga Hantidhowrka. Wakiillo ka socda Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta waxay ka qayb geli karaan shirarkaas.

3) Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta wuxuu soo saari karaa awaamiir iyo tilmaamooyin ku saabsan fulinta hawlaha Iskaashatada, wuxuu awood u leeyahay inuu beddelo go'aannada Xubnaha Iskaashatada ee ka soo horjeeda sharciga iyo danta Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

QAYBTA 2aad

XUBINNIMADA ISKAASHATADA

4. *Gelitaanka.* — 1) Qofka ka soo baxa shuruudda ku qoran qodobka 6aad ee Sharciga Qareennada wuxuu xubin ka noqonayaa Iskaashatada Qareennada.

2) Gelitaanka Qareenka ee Iskaashatada waxaa goynaya Guddiga Maamulka ee Iskaashatada. Dhaqan gelidda go'aanka Guddiga Maamulka wuxuu ku xiran yahay ogolaanshaha Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

3) Qofka xubin ka noqonaya Iskaashatada waa inuu siiyaa Iskaashatada Sh. So. 250.

4) Gelitaanka Iskaashatada ee Qareenka wuxuu dhaqan galayaa maalinta Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta uu ogolaado go'aanka Guddiga Maamulka.

5. *Xuquuqda iyo waajibaadka.* — 1) Xubnaha Iskaashatada ee Qareennada waxay waq u leeyihiin:

- a) Inay ku shaqaystaan Qareennimo.
- b) Inay ka faa'iidaystaan khadamaadka Iskaashatada.
- t) Inay si sinnaan ah uga qayb galaan doodaha iyo go'aannada fadhigada guud.
- j) In loo doorto xubnaha Iskaashatada.

2) Xubnaha waxaa waajib ku ah:

- a) Inay dhawraan sharciyada Waddanka gaar ahaan sharciga Qareennada.
- b) Inay si buuxda uga qayb galaan maamulka iyo hawlaha Iskaashatada.
- t) Inay si joogta ah u kordhistaan garashadooda siyasadeed iyo tan sharcigaba.

6. *Dhammaanshada xubinnimada Iskaashatada.* — 1) Xubinnimada Iskaashatada waxay dhammaanaysa marka:

- a) Geeri ay ku timaado xubinta.
- b) Qofka xubinta ahi istiqaala uu keeno.
- t) Qofka xubinta ah laga saaro Iskaashatada.

2) Istiqaaladda xubinta waa in lagu caddeeyaa qoraal loo gudbinayo Guddiga Maamulka; waxayna dhaqan galeysaa sannadka lacagta aakhirkiisa.

3) Ka saaridda xubinta waxa keliya ay ka dhalan kartaa tillaabooyin asluubeed. Go'aanka ka saaridda ee Guddiga Maamulka waa in lagu ogolaadaa fadhiga guud ee Iskaashatada.

QAYBTA 3aad

XUBNAHA ISKAASHATADA

7. *Xubnaha Iskaashatada waa kuwa soo socda:*

- a) Fadhiga guud.
- b) Guddiga Maamulka.
- t) Guddoomiyaha.
- j) Guddiga Hantidhowrka.
- x) Xisaabiyaha.

2) Xubnaha Guddiga Maamulka iyo Guddiga Hantidhowrka waxaa dooranaya fadhiga guud. Waxayna mas'uul u yihiin fadhiga guud.

3) Xisaabiyaha waxaa qoranaya Iskaashatada.

4) Muddada doorashada ee Xubnaha Iskaashatada waa laba sano. Fadhiga guud mar kasta wuxuu shaqada ka fariisin kara madaxda la doortay.

8. *Fadhiga guud ee Iskaashatada.* — 1) Fadhiga guud waa xubinta ugu sarreysa ee Iskaashatada Qareennada, wuxuuna awood u leeyahay inuu go'aanno ka gaaro arrimaha muhiimka ah ee Iskaashatada iyo inuu doorto xubnaha.

2) Fadhiga guud oo keliya ayaa awood u leh waxyaabaha soo socda:

- a) Ogolaanshaha nidaamka gudaha ee Iskaashatada.
- b) Inuu doorto Guddiga Maamulka iyo kan Hantidhowrka.
- t) Shaqa ka fadhiisinta madaxda la doortay.

- j) Inuu go'aan ka gaaro qorsheynta horumarka.
 - x) Inuu ogolaado xogwarranka lacagta ee sannadka.
 - kh) Inuu go'aan ka gaaro qaybinta dakhliga iyo maamulidda fundooyinka Iskaashatada.
 - d) Inuu go'aan ka gaaro dhismaha Laamaha Iskaashatada.
- 3) Fadhiga guud wuxuu ansaxi karaa marka ay ka soo qayb galaan ugu yaraan xubnaha intooda badan (Simple majority). Fadhiga guud wuxuu go'aannadiisa ku gaarayaa codka xubnaha intooda badan (majority decisions).
- 4) Ugu yaraan sannadkii waa in la qabtaa laba fadhi oo guud, Fadhiyada guud waxaa isugu yeeraya Guddiga Maamulka. Guddiga Maamulka waxaa waajib ku ah inuu isugu yeero fadhi guud haddii sidaas ay warsadaan saddex meelood meel xubnaha Iskaashatada ama haddii uu codsado Guddiga Hantidhowrka.

9. Guddiga Maamulka. — 1) Guddiga Maamulka waa hay'adda fulinta ee fadhiga guud; wuxuuna ka kooban yahay 3 ilaa 5 xubnood. Guddiga Maamulka wuxuu dooranayaa Guddoomiye iyo Guddoomiye Ku-xigeen.

2) Guddiga Maamulka wuxuu hawsha Iskaashatada ku wadayaa sharciga iyo go'aannada fadhiga guud. Waa inuu qaban qaabiyaa fadhiyada guud, isku soo dubaridda xogwarranka loo baahan yahay, dhageystanna dacwadaha asluubta ee uu awoodda u leeyahay.

3) Guddiga Maamulka waa inuu go'aannadiisa ku gaaraa codka xubnaha intooda badan. Xubnaha Iskaashatada oo dhan waa inay raacaan go'aankaas. Go'aannadaas waxaa burin kara fadhiga guud oo keliya.

4) Guddiga Maamulka wa inuu sannadkii laba goor hawlihiisa warbixin ka siiyaa fadhiga guud.

5) Guddiga Maamulka waa inuu yeeshaa fadhi bishiiba hal mar ugu yaraan. Fadhiigaas waa inuu isugu yeeraa Guddoomiyaha ama Ku-xigeenkiisa.

10. Guddoomiyaha Iskaashatada. — 1) Guddoomiyaha waa inuu ku maamulaa hawsha joogtada ah ee Iskaashatada sharciga iyo go'aannada fadhiga guud iyo kuwa Guddiga Maamulka.

2) Guddoomiyaha, Ku-xigeenkiisa, ama xubin kale oo ka mid ah Guddiga Maamulka ayaa si sharci ahaanna wakiil uga noqon kara Iskaashatada.

3) Guddoomiyaha waa inuu iskaashi adag la yeeshaa xisaabiyaha xagga arrimaha lacagta.

4) Guddoomiyaha wuxuu mas'uul u yahay Guddiga Maamulka iyo fadhiga guud.

11. Guddiga Hantidhowrka. — 1) Guddiga Hantidhowrka waa xubinta kormeerta hawlaha ku saabsan lacagta ee Iskaashatada iyo dhawrida sharciyada iyo go'aannada fadhiga guud.

2) Guddiga Hantidhowrka wuxuu ka kooban yahay 3 ilaa 5 xubnood. Wuxuuna dooranayaa Guddoomiye iyo ku-xigeenkiisa.

3) Guddiga Hantidhowrka waa inuu sameeyaa kormeer joogta ah warbixinna ka siiyaan hawshooda Guddiga Maamulka ama fadhiga guud. Guddigu waa inuu sannadkii laba goor kormeeraa hawsha xisaabiyaha.

4) Guddiga Hantidhowrka wuxuu awood u leeyahay inuu kormeero Gobolka, warqadaha iyo diiwannada Iskaashatada.

12. Xisaabiyaha. — 1) Xisaabiyuhu wuxuu madax ka yahay Waaxda Xisaabta; waana inuu ka kaalmeeyaa Guddoomiyaha iyo Guddiga Maamulka xagga arrimaha lacagta ee Iskaashatada.

2) Xisaabiyuhu si uu u kormeero arrimaha lacagta ee Iskaashatada waa inuu saxiixaa jeegagga iyo warqadaha lacagta oo dhan.

3) Xisaabiyuhu waa inuu Guddoomiyaha Iskaashatada iyo Guddiga Maamulka xogwarren buuxda ka siiyaa arrinaha lacagta.

4) Xisaabiyaha iyo Guddiga Maamulka waa iney xogwarranka lacagta ee sannadka hordhigaan fadhiga guud.

13. Laamaha Iskaashatada. — 1) Iskaashatadu iyadoo tixgelinaysa baahida kolba loo qabo difaaca xagga sharciga iyo tirada Qareennada ayey Laamo ka dhisan kartaa Degmooyinka marka sidaa uu ogolaado Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka Iyo Arrimaha Diinta.

2) Fadhiga guud isagoo cuskanaya ogolaanshaha Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta waa inuu go'aan ka gaaraa dhismaha Laamaha, awooddooda, xarumahooda, magacaabidda shaqaalaheeda iyo madaxdeeda.

3) Madaxa Laanta wuxuu mas'uul u yahay Guddoomiyaha Guddiga Maamulka iyo fadhiga guud ee Iskaashatada.

QAYBTA 4aad

HAWLAHA IYO ARRIMAHA LACAGTA

14. Nidaaminta hawlaha. — 1) Guddoomiyaha Iskaashatada iyo Guddiga Maamulka waa inay si cilmi ku dhisan u maamulaan hawlaha Iskaashatada.

2) Guddiga Maamulka waa inuu soo saaraa nidaamka gudaha oo lagu habeynaya shaqada, iyo liista ku saabsan tirada, shahaadooyinka iyo mushaaharka shaqaalaha la qoro.

3) Guddoomiyaha Iskaashatada isagoo cuskanaya go'aannada Guddiga Maamulka wuxuu qorayaa shaqaalaha loo baahan yahay (karaaniyaal, makiinad Qaraace, iwm.), kireyaa, alaabna dhigaa xafiisyada, keenaana alaabta wax lagu qoro iyo kutubta sharciga.

4) Guddiga Maamulka waa inuu qaban qaabiyaa tababarro siyaasadeed, farsameed ee xubnaha Iskaashatada iyo shaqaalaheeda.

15. Dadka iyo hay'adaha la daafacayo. — 1) Dadka iyo hey'adaha la daafacayo waxay dooran karaan Qareennadooda. Haddii dadka ama hey'adaha la daafacayaa ay dooran waayaan Qareennadooda, Guddoomiyaha Iskaashatada ama Madaxa Laanta ayaa u dooraya Qareen.

2) Qareenku wuxuu la yeelanayaa heshiisyo dadka ama hey'adaha uu daafacayo, isagoo ka wakiil ah Iskaashatada. Dadka ama Hay'adaha la daafacayo waxay lacagta toos ahaan ugu shubaayaan xisaabta Iskaashatada, ama caddaan bay ugu dhiibayaan xisaabiyaha Iskaashatada.

3) Xushmadda la bixinaya waa tan ku qoran warqaddo tilmaamooyinka ku lifaaqan sharciga Qareennada.

4) Guddoomiyaha Iskaashatada iyo Madaxa Laanta waxaa waajib ku ah inay ilaaliyaan danta dadka iyo hey'adaha la daafacayo ee Qareenkiisu ey u suurtoobi weydo inuu daafco.

16. Sirta xirfadda. — 1) Marna Qareenka uma bannaana, iyadoo ay ogol yihiin dadka hey'adaha la daafacayo mooyee inuu faafiyo:

a) Wax kasta oo loogu sheegay qarsoodi; ama.

b) Wax kasta oo uu ku ogaadey shaqada qareennimada dhexdeeda oo ayna ku jirin wararka ku saabsan nabadgelyada iyo midnimada Qaranka.

2) Waxayaabaha lagu sheegay qaybta hore waxaa kaloo lagu dabbaqayaa shaqaalaha Iskaashatada.

17. Dakhliga Iskaashatada iyo qaybintiisa. — 1) Dakhliga saafiga ah ee Iskaashatada waxaa loogu qaybinayaa xubnaha sida shaqadoodu ahayd oo ey Iskaashatada wax u soo geliyeen.

Inta aan la qaybin ka hor, 5% ee lacagta saafiga ah waxaa loo goynayaa sanduuqa kaydsiga ah iyo 3% sanduuqa bulshada.

2) Qaybinta dakhliga saafiga ah waxaa sal u ah xogwarranka lacagta ee sannadka ee uu ogolaado fadhiga guud. Dakhliga guud waxaa laga goynayaa qaybaha loo baahan yahay ee kharajka Iskaashatada ee ay ku jiraan canshuuraadka Dawladda.

3) Xubinta waxaa loo hormarinayaa bishii 50% ee xushmadda uu soo geliyo Iskaashatada, 50% kalena marka laga gooyo waxaa la siinayaa xubinta sannadka dhamadkiisa marka uu ogolaado fadhiga guud.

18. Istimaalaka sanduuqa kaydsiga iyo tan bulshada. — 1) Sanduuqa kaydsiga waxaa lagu isticmaalayaa socodsiinta hawlaha Iskaashatada haddii loo baahdo. Istimaalaka sanduuqa kaydsiga wuxuu u baahan yahay ogolaanshaha fadhiga guud.

2) Sanduuqa bulshada waxaa lagu isticmaalayaa kaalmeynta xubnaha iyo shaqaalaha baahan. Lacag kasta oo laga bixinaayo sanduuqa bulshada waxay u baahan tahay ogolaanshaha Guddiga Maamulka.